# Talaalka Afka ee Rotavirus?

## Waa maxay cudurka Rotavirus?

Rotavirus waa caabuq fayraska ka dhasha kaasoo keena shuban iyo matag ku dhaca ilmaha dhashay iyo carruurta yaryar. Waa cudur aad u caabuq badan. Waa cudurka ugu badan ee keena cudurka gastroenteritis ee ku dhaca carruurta Ireland ee kayar 5 sano. Wuxuu badanaa dhacaa xiliyada Gu'ga iyo Jiilaalka.

Inta badan carruurta ayaa soo bogsooda ayagoo guriga jooga laakiin qaar ayaa u baahan in isbitaal la seexsho. Sanad kasta gudaha Ireland ku dhawaad 1000 carruur ah oo kayar 5 sano jir ayaa isbitaaka loo dhigaa caabuqa rotavirus. Mudada celcelis ahaan waqtiga ay isbitaalka jiifaan ayaa ah 5 maalmood. Ilmaha yaryar iyo carruurta ayaa hadda laga difaaci karaa cudurkaan ayadoo la siinaayo talaalka afka laga qaato ee rotavirus.

## Sidee ayuu cudurka rotavirus ugu dhacaa dadka?

Rotavirus waa cabuq xun si fudud yuuna ku faafi karaa. Wuxuu ku faafi karaa gacmaha oo lagu taabto afka, sida taabashada boonbaleyaasha, dusha meelaha, kastuumada wasaqda ah ama wuxuu ku faafi karaahawada asagoo soo raaca qufaca iyo hindhisada.

## Waa maxay astaamaha cudurka rotavirus?

Rotavirus ka ayaa sababa shuban kaasoo noqon kara mid daran, calool xanuun, matag, fuuq bax iyo qandho fudud. Astaamaha ayaa yimaada 1 - 3 maalmood kadib marka qofka uu ku dhaco caabuqa rotavirus waxayna socon karaan ku dhawaad 3-8 maalmood. Marar dhif ah shubanka ayaa socon kara 3 asbuuc, Carruurta qaba cudurka rotavirus ayaa caabuqa faafin kara laga bilaabo 2 maalmood kadib markuu ku dhacay caabuqu iyo ilaa 10 maalmood kadib marka ay jiradaan.

Haddii 1,000 carruur ah uu ku dhaco rotavirus:

- 1,000 kaba waxaa u dhici doona matag iyo shuban
- 3 ayaa u baahan doona in isbitaal la dhigo si loo daaweeyo.
- Ilmaha yaryar ayaa u baahan inay isbitaalka joogaan celcelis ahaan 5 maalmood, haddii la dhigo.

Carruurta ayaa qaadi kara cudurka rotavirus wax ka badan halmar waayo waxaa noocyo badan oo fayraska rotavirus ah, laakiin caabuqyada labaad ayaa ka xanuun yar caabuqyada koobaad.

Haddii aad ka walaacsan tahay in ilmahaagu uu qabo caabuqa rotavirus, fadlan u tag dhakhtarkaaga GP ga si uu u baaro.

## Talaalka rotavirus ma lagu baxshaa wadamada kale?

Haayada Caafimaadka Aduunka ayaa ku talisay talaalka rotavirus wadamo kale oo badan ayaana siisa ubadkooda dhashay. Talaalka ayaa ruqsad la siiyay sanadkii 2006. Talaalka Rotavirus ayaa lagu daray jadwalka talaalka wadanka Australia sanadkii 2007 halka UK lagu daray 2013. Maraykanka iyo ugu yaraan 11 dal oo kale oo Yurub kamid ah ayaa bixiya barnaamijyada talaalka rotavirus.

## Yay tahay Inuu qaato Talaalka rotavirus?

Cudurka Rotavirus ayaa looga hortagi karaa talaal. Dhammaan carruurta dhashay markay ahayd ama kadib 1 Oktoobar 2016 ayaa la siiyay talaalka afka laga qaato ee Rotavirus markay jireen 2 iyo 4 bilood.

Talaalka afka ee Rotavirus waa **inaan** la siin ilmaha jira 8 bilood iyo 0 maalmood ama kawayn.

## Goorma ayay tahay in talaalka Afka ee Rotavirus dib loo dhigo?

Talaalka waa in dib loogu dhigaa ilmaha la xanuunsan

- qandho aad u daran ama,
- xanuunka daran ee mataga ama shubanka

ilaa uu si buuxdo u bogsoodo.

Talaalka afka ee Rotavirus **LAMA** siin karo ilmaha jira 8 bilood iyo 0 maalmood ama kawayn.

## Ma tahay in ilmo horey u qabay fayraska rotavirus uu wali qaato talaalka?

Haa. Ilmaha kasoo bogsooday caabuqa rotavirus ayaa laga yaabaa inuusan lahayn difaaca ka dhanka ah dhammaan noocyada fayraska ee talaalku ka hortago. Talaalka ayaa ka caawin doona in ilmuhu difaac fiican ka helo noocyada kale ee caabuqa. Marka ilmaha horey u qabay xanuunka rotavirus waa inay wali qaataan talaallada kahor da'da 8 bilood 0 maalmood.

## Maxaa talaalka afka laga qaato loogu daray jadwalka rasmiga ah ee talaalka carruurnimada hore?

Cudurka Rotavirus waa mid badanaa dhaca marka ay da'daan marayaana inta badan ilmaha ayaa qabi doona matag iyo shuban ka dhasha cudurka Rotavirus. Daraasaadka ayaa muujiyay in talaalka afka laga qaato ee Rotavirus uu aad ugu haboon yahay kahortaga cudurka Rotavirus ee ilmaha yaryar talaalka afka laga

qaato ee Rotavirus ayaa ka difaaca ilmaha yaryar iyo carruurta cudurkaan guud. Tirada carruurta qaba cudurka Rotavirus ayaa hoos u dhacday kadib markii talaalka Rotavirus lagu daray barnaamijka talaalka 2016.

## Talaalka Afka ee Rotavirus ma ka hortagaa dhammaan cudurka gastroenteritis?

Talaalka afka ee Rotavirus ayaa kahortaga cudurada gastrointestinal oo oo ka dhasha caabuqa rotavirus. Kama hortagayso cudurada ka dhasha caabuqyada kale ee fayraska gastrointestinal, sida norovirus.

## Yay tahay inuusan qaadan talaalka afka ee Rotavirus?

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka afka ee norovirus. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka afka ee norovirus haddii uu:

- xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka;
- dhuun xiran horey u soo maray (intussusception);
- laga helay isku jirka daran ee daciifka difaaca jirka  (SCID);
- dhibaato ka haysata hunguriga (dhuunta) taasoo kordhin karta khatarta dhuun xiranka;
- zanuunka fructose intolerance, sucrose – yaraanta maltase ama glucose-galactose malabsorption (u dulqaadasho la'aanta sonkorta) ee dhaxalka ah.
- Ilmaha yaryar ee hooyooyinka qaata infliximab dhammaan inta ay uurka leeyihiin iyo/ama inta ay naaska nuujinayaan, waa inaan la siin talaalka Rotavirus.
  Tixgelin ayaa la siin karaa siinta talaalka Rotavirus haddii daawada hooyada uurka leh ee infliximab aysan dhaafsiisnayn sadexda bilood ee ugu danbaysa uurka ee ilmaha aan naaska loo dhigin.

Talaalka afka ee Rotavirus **waa inaan** la siin ilmaha jira 8 bilood 0 maalmood iyo ka wayn maadaama khatarta dhuun xiranka (intussusception) ay ku badan tahay carruurta waawayn.

## Sidee loo baxshaa talaalka Rotavirus?

Talaalka Afka ee Rotavirus ayaa dhibco dareere ahaan ah loogu shubaa afka ilmahaaga.

Waa inaad daawataa sida GP gaaga (dhakhtarka) / kalkaalisadu dhibcaha afka ee rotavirus u siiso si aad u aragto sida ilmaha loo siinaayo daawada baristamoolka dareeraha ah, kaasoo lagu talinaayo kadib talaalka MenB.

Waxaad quudin kartaa cunugaaga heer kasta kahor ama kadib talaalka**.**

## Waxa aad filanayso kadib qaadashada talaalka afka ee Rotavirus?

Kadib marka talaalka la siiyo, cunugaaga ayaa lahaan kara shuban fudud. Sii cunugaaga caano badan oo xaqiiji inuu biyo badan cabo.

Si taxadar leh u farxalo kadib marka aad badesho ama aad qashinka ku rido xafaayada ilmahaaga.

Ilmaha qaata talaalka afka ee Rotavirus:

- 1 kamid ah 10 qof ayaa yeesha shuban fudud
- 1 kamid ah 100 qof ayaa yeesha calool xanuun
- 1 kamid ah 100 qof ayaa yeesha murmiraxa maqaarka.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood

Ciladaha daran (xasaasiyada daran) ayaa aad dhif u ah.

Marar dhif ah, ilmaha ayay xirmi kartaa dhuuntu (kaasoo loo yaqaano intussusception).

Gudaha Ireland, ku dhawaad 1 kamid ah 1500 oo ilmood ayaa xanuunkaan ugu dhacayaa si dabiici ah, wuxuuna ugu badan yahay inta u dhexaysa da'aha 5 bilood iyo 1 sano. Xiranka dhuunta kadib talaalka afka ee Rotavirus ayaa ku dhacaysa ku dhawaad 1 kamid ah 50,000 oo la siiyo talaalka rotavirus.

Carruurta dhuuntu xiranto ayaa aad uga xanuusada caloosha. Xanuunka ayaa imaanaaya kadibna ka baxayaa, laakiin wuu soo badanayaa dhawr saacadood kadib. Midabka ilmaha ayaa xawiif noqonaaya inta qandhadu qabanayso wayna ooynayaan. Sidoo kale ilmaha ayaa jiran kara oo dhiig lagu arki karaa xafaayadooda. Haddii sidaan dhacdo, la xiriir GP gaaga (dhakhtarka) **isla markaba**. Xanuunkaan ayaa lagu daawayn karaa isbitaalka.

## Sidee talaalka afka ee Rotavirus u shaqeeyaa?

Talaalka ayaa shaqeeya asagoo u sahla nidaamka difaaca jirka inuu dhiso difaac ka dhan ah cudurka rotavirus.

## Waa sidee waxtarka talaalka rotavirus?

Talaalka rotavirus ayaa la xaqiijiyay inuu waxtar, asagoo difaac dhan 82-94% ka bixinaaya noocyada rotavirus.

## Cunugayga ma la siin karaa talaalka Rotavirus xili uu la joogo hawweneey uur leh?

Haa. Wax dhib ah malahan tani. Xaqiiqdii, talaalida ilmaha ayaa ka difaacaya haweeneeyda uurka inay ku dhacaan cudurada sida rotavirus. Hase yeeshee, talaalka Rotavirus waa talaal afka laga qaato, haweenka uurka leh waa inay si taxadar leh u farxashaan kadib markay ilmaha ka badelaan xafaayada.

## Ilmuhu ma aadi karaa dabaal kadib talaalka afka ee Rotavirus?

Haa. Waa inaad raacdaa talaabooyinka caadiga ah ee nadaafada marka aad badelayso xafaayada ilmahaaga kadib talaalka afka ee Rotavirus. Haddii cunugaaga uu ku dhaco shuban kaasoo ah cilad ka dhashay talaalka, cunugaagu waa inuusan dabaal aadin muddo labo asbuuc ah kadib marka shubanku ka joogsado.

## Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie